



KA MAMNUUCIDDA KADEEDKA GALMADA IYO NIDAAMKA CABASHADA

Dugsiyada Dadwaynaha Seattle waxay u heellan yihiin waxbarasho habboon oo wax soo saar leh iyo jawi shaqo oo ka madax banaan sinaan la'aan. Degmadu waxay mamnuuceysaa kadeedka galmada ee ardayda, shaqaalaha iyo kuwa kale ee ku lug leh barnaamijka ama waxqabad dugsi kasta, oo ay ka mid yihiin dhismaha dugsiga, baska dugsiga, ama meelshs ka baxsan dhismaha xilliga howlaha dugsigu maalgaliyo.

Xad-gudubka galmada waa dabeeecad aan la jeclaysi ama isgaarsiineed oo ah galmo dabiiciga ah marka:

- Marka Arday ama shaqaale la rumaysan yahay in isaga ama iyadu ay ay soo gudbiyaan habdhaqanka galmada ama isgaadhsinta si aay u helnaan wax soo celin, sida fasalka, dhiirigelinta, booska kooxda isboortiga, ama go'aan kasta oo waxbarasho ama shaqo , ama
- Ficilku uu si aad ah u faragaliyo waxqabadka waxbarashada ardayga, ama uu abuurayo jawi cabsi ama cadawtinimo ah ama waxbarasho deegaaneed.

Tusaalooyinka Dhibaataynta Galmada:

- In qofka lagu cadaadiyo waydiisiga galmada
- Taabashada aan la doonayn ee dabeeecad galmo
- Qorida qoraallada dabeeecada galmada
- Qaybinta qoraaladda galmada tooska ah, e-mails, ama sawiro
- Samaynta kaftanka galmada, wararka xanta ah, ama muujinta aflagaada
- Dhaawac jireed, oo ay ku jiraan kufsiga iyo weerarada galmada

Sidee ayaan u soo gudbiya warbixinta kadeedka galmada?

Haddii aad aaminsantahay in qof ka mid ah degmo dugsiyeedka ay ku dhacday dhibaateyn galmo ee dugsiga ama goobta shaqada, waxaad xaq u leedahay inaad soo gudbiso cabasho rasmi ah. Si aad u heshid nuql buuxa nidaamka cabashooyinka galmada ee dugsiga degmada, u soo dir Xafiiska Xuquuqda Ardayga

OSCR@seattleschools.org ama booqo

<https://www.seattleschools.org/cms/One.aspx?portalId=627&pageId=1300431>

Ka hor inta aadan sameeyn cabashada, waxaa laga yaabaa inaad rabto inaad kala hadasho cabashooyinkaaga maamulaha dugsiga dhismaha; kormeeraha shaqada; ama Ombudsperson-ka Dugsiga Dadweynaha Seattle Ombudsman@seattleschools.org.

Si aad u soo gudbiso cabashada kadeedka:

Ardayda, waalidiinta/xannaaneeyayaasha, iyo xubnaha dadweynaha, Xafiiska Xuquuqda Ardayda (OSCR) ayaa loo qoondeeyey inay xalliyaan su'aalaha iyo cabashooyinka kufsi-galinta kufsiga ee la xiriirta ardayda, waalidka / xannaaneeyayaasha, iyo xubnaha dadweynaha. Si aad ula xiriirto xubin ka mid ah OSCR, wac 206-252-0306; u dir email OSCR@seattleschools.org; ama boostada ugu dir Seattle Public Schools, MS 32-149, P.O. Box 34165, Seattle, WA 98124-1166.

Shaqaalaha, Waaxda Shaqaalaha (HR) ayaa loo qoondeeyey inay xallilaan su'aalaha iyo cabashooyinka kufsiga ee loo geystey shaqaalaha. Si aad ula xiriirto xubin ka mid ah HR, wac 206-252-0024; u dir email HREEOC@seattleschools.org; ama boostada ugu dir Seattle Public Schools, MS 33-157, P.O. Box 34165, Seattle, WA 98124-1166.

NIDAAMKA CABASHADA KADEEDKA GALMADA

Talaabada 1aad: Dacwada Dugsiga Degmada

Xaaladaha intooda badan, cabashooyinka waa in lagu soo gudbiyaa hal sano gudaheed laga bilaabo taariikhda dhacdada la sheegay. Cabashadu waa inay ahaataa mid qoraal ah, sharaxaysa waxa dhacay, iyo sheegay sababta aad u aamminsan tahay inuu yahay kadeedka galmada. Cabashooyinka waxaa lagu soo diri karaa boostada, emailka, ama gacan loogu keeni kara maamulka dugsiga, kormeeraha shaqada, Xafiiska Xuquuqda Ardayga, ama Waaxda Shaqaalaha.

Marka dugsiya degmadu helo cabashadaada qoraalka ah, waxaa lagu siin doonaa nuqlu ka mid ah Nidaamka kadeedka iyo hanjabaadda Degmada iyo nidaamka cabashooyinka takoor la'aanta. Xafiiska Xuquuqda Ardayga ama Waaxda Shaqaalaha ayaa markaa hubin doona in dugsigu talaabo ka qaado xallinta cabashada, oo ay ku jiri karto baaritaan deg-deg ah oo faahfaahsan.

Dugsiga degmadu waa inuu ku jawaabceliso si qoraal ah 30 maalmood gudahood ka dib markaad hesho cabashadaada haddii aadan ku qanacsanya taariikh kale ama xaalado gaar ah oo la xariira cabashadu waxay u baahan tahay kordhinta waqtiga xadidan. Haddii xalinta cabashadu ay qaadato in ka badan 30 maalmo taariikhheed, waxaa lagugu soo wargalin doonaa qoraal ahaan sababaha mudada dheeraadka iyo taariikhda la filayo jawaabta.

Marka ay degmadu ka jawaabayso cabashadaada ka dib dhammaystirida baaritaanka, jawaabta waa in ay si cad u sheegtaa haddii dugsiga degmada uu:

1. Inuu diido eedeymaha ku jira cabashada; ama
2. Uu xaqijiyyaa eedeymaha iyo liiska tallaabooyinka saxitaanka.

Intaa waxaa dheer, jawaabtu waxay ku jiri doontaa ogaysiis xaqqa aad u leedahay racfaan haddii iskoolka degmada diido eedeynta, oo ay ku jirto meesha iyo qofka rafcaanka loo xilsaaray.

Tallaabo 2: Rafcaanka Kormeeraha Guud

Haddii aadan ku raacsaneyn go'aanka dugsiga degmada ee ku aaddan eedeynta, waxaad racfaan u qaadan kartaa Kormeeraha Guud. Waa inaad ku soo xareysaa ogeysiiska rafcaanka qoraal ahaan Xafiiska Kormeeraha Guud 10 maalmood ka dib markaad heshay jawaabta degmada ee cabashadaada.

Marka uu helo rafcaan go'an, Kormeeraha Guud wuxuu magacaabayaa baaraha dhexdhedaadinta oo dhexdheda si dib loogu eego racfaanka. Dhegeysi ayaa la qorsheynayaa oo waxaad keeni kartaa markhaatiyo ama maclumaad kale oo la xiriira rafcaankaaga dhegeysiga.

Go'aan qoraal ah ayaa laguu soo diri doonaa 30 maalmood gudahood ka dib marka degmadu heshay ogeysiiska racfaanka. Go'aanka qoraalka ah waxaa ku jiri doona maclumaad ku saabsan sida loo xerayo cabasho Xafiiska Kormeeraha Guud ee Waxbarashada Dadweynaha (OSPI).

Talaabada 3aad: Dacwada OSPI

Haddii aadan ku raacsaneyn go'aanka rafcaanka degmada, waxaad u diri kartaa cabasho Xafiiska Kormeeraha Guud ee Waxbarashada Dadweynaha. Cabashada waa in lagu xereeyaa OSPI 20 maalmood gudahood ka dib markii aad heshay go'aanka rafcaanka degmada. Waaad u diri kartaa cabashadaada OSPI e-mail: Equity@k12.wa.us; faks: (360) 664-2967; ama boostada: Xafiiska OSPI Sinnaanta iyo Xuquuqda Rayidka, PO Box 47200, Olympia, WA 98504-7200.